

PACER waxey qoyska ku dhiiro gelineysaa, in ay isku deyaan xalinta khilaafaadka iyagoo marka hore dhibaatooyinkooda la wadaaga maamulaha qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed. Ama agaasimaha arimaha waxbarashada gaar ahaaneed ee degmada. Hadii khilaafaadka lagu xalin waayo heerkaa, iyadoo ay ku xiran tahay hadba habraaca la doorto,

Waalidku waxuu iyadoo qoraal ah la xiriiri karaa:

Kulan Maslaxo (consiliation), Kulan Dhexdhexaadin (Mediation), Kulan Qorshaha Waxbarashada Gaar ahaaneed ee la saacidey (Facilitated IEP Meeting):

U soo dir codsi qoraal ah agaasimaha arimaha waxbarashada gaar ahaaneed ee degmada iyo maamulaha dugsiga

Dacwad Gobolka ah ama Dacwad-Qaad Habraaca Sharciyeed:

U soo dir koobi dacwadda aad qabto ah ama u dir agaasimaha arimaha waxbarashada gaar ahaaneed ee degmada codsi dhegeysasho ah:

Maamulaha Dacwad-Qaad Habraaca Sharciyeed

Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota
Qeybta Kaalinta iyo Xeer ilaalinta
1500 Highway 36 West
Roseville, MN 55113-4266
Tel. (651) 582-8689 Fax: (651) 582-8725
www.education.state.mn.us

Dacwad qeybta 504 ee Minnesota:

Xafiiska Xuquuqda Dadweynaha-Chicago
U.S. Department of Education
Citigroup Center
500 W Madison Street, Suite 1475
Chicago, IL 60661
Tel. (312) 730-1560, (877) 521-2172
FAX: (312) 730-1576 TDD: (312) 730-1609



Hey'adda PACER Center

Hey'adda PACER waa xarunta qoyska leh dhalaanka iyo dhaliyarada leh dib u dhaca; sida naafada laxaadka, grashada, wax barashada, iyo dareenka. Falsafadda hey'addu waa mid ku saleysan waalidka oo caawiya waalidka kale.

Hey'adda PACER Center waxey bixisaa tababaro, akhbaaro daabacan, iyo kheyraad kale, ee ka caawiya waalidka xagga waxbarashada, tababaro howl qabad, shaqaaleeynta, iyo howlo kale ee loogu tala galay ilmahooda ama dhalinyarada dib u dhaca leh.



Siyaado ka baro barnaamijyada Hey'adda PACER, booqo bogga:
PACER.org

Ama si toos ula soo xiriir:

PACER Center, Inc.

8161 Normandale Blvd.

Minneapolis, MN 55437-1044

Voice: (952) 838-9000

Toll-free in MN: (800) 537-2237

E-mail: PACER@PACER.org

Paula F. Goldberg, Executive Director

DOORKA HABRAACA SHARCIYEED

MINNESOTA DUE PROCESS OPTIONS—SOMALI VERSION

Xalinta khilaadka, iyadoo la adeegsanaya Nidaamka Waxbarashada gaar Ahaaneed



Daabacidda waraaqdan warbixinta ah, waxaa maal gelinta qeyb ka qaatay Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota.

952.838.9000 | PACER@PACER.org | PACER.org

DOORKA HABRAACA SHARCIYEED

MINNESOTA DUE PROCESS OPTIONS

Tani waa akhbaar guud ahaaneed keliya; fadlac wac PACERcenter ama Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota haddaad akhbaaro siyaado ah dooneyso

FURSADHA KHILAAF XALINTA AAD DOORAN KARTO	<p>Conciliation Kulan Maslaxo Waa qasab in la qabtaa haduu waaliku codsado</p>	<p>Mediation Kulan Dhexdhexaadin Mid ay labada dhinacba door u leeyihiin</p>	<p>Facilitated Individualized Education Program Kulan Qorshaha Waxbarashada Gaar ahaaneed ee la saacidey Mid ay labada dhinacba door u leeyihiin</p>	<p>State Complaint Dacwad Gobolka ah</p>	<p>Section 504 Complaint Dacwadda Qeybta Sharciga 504</p>	<p>Due Process Hearing Dacwad-Qaad Habraaca Sharciyeed Waa qasab in la qabtaa hadii labada dhinacba codsadaan</p>
ARIMAHA JIRA	<p>Waalidka iyo Dugsiga marka ay isku khilaafaan aqoonsashada, qiimeynta, meeleynta ama howlaha</p>	<p>Waalidka iyo Dugsiga marka ay isku khilaafaan aqoonsashada, qiimeynta, meeleynta, howlaha ama arimo kale</p>	<p>Marka waalidka iyo Dugsiga isku raaci waayaan barnaamijka qorshaha waxbarasho</p>	<p>Dacwad aad ku andaconeyso in degmada dugsi fulineyn sharciga ama habraaca sharciyeed</p>	<p>Dacwad aad ku andaconeyso in ilmahaaga la takooray xanuun dib u dhac awgeed</p>	<p>Waalidka iyo Dugsiga marka ay isku khilaafaan aqoonsashada, qiimeynta, meeleynta ama howlaha</p>
YAA INTA BADAN KA QEYB QAATA	<p>Agaasimaha waxbarashada gaar ahaaneed ee degmada, shaqaalaha degmada, waalidka</p>	<p>Dad dhexdhexaadiye ah, shaqaalaha degmada, waalidka, iyo dad kale ee labadaba dhan ka socda</p>	<p>Kooxda waxbarashada gaar ahaaneed iyo qof kulanka saacidaya</p>	<p>Waalidka, hey'ado ama qof walba ee muwalad ah; Wasaaradda waxbarashada ee Minnesota, qeybta kaalinta iyo xeer ilaalinta</p>	<p>Waalidka, hey'ado ama qof walba muwalad ah; xeer ilaaliye arimaha 504 qaabilsan, xeer ilaaliye ka socda xafiiska xuquuqda (Qeybta 5aad Chicago)</p>	<p>Gar qaade, Waalidka, shaqaalaha degmada, marqaati qibrad leh, qareen</p>
CIDDA GO'AANKA GAARTA	<p>Waalidka iyo degmada</p>	<p>Waalidka iyo degmada</p>	<p>Kooxda waxbarashada gaar ahaaneed oo caawinaad ka helaya qofka kulanka saacidaya</p>	<p>Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota, Qeybta kaalinta iyo xeer ilaalinta</p>	<p>Xeer ilaaliye ka socda xafiiska xafiiska xuquuqda dadweynaha (Qeybta 5aad Chicago)</p>	<p>Gar qaade Hadii dacwadda rafcaan loo gudbiyo, gar qaade dacwadda rafcaanka u qaabilsan</p>
WAQTIGA	<p>Ka dib marka codsiga la helo:</p> <ul style="list-style-type: none"> Waa in Kulanka la qabtaa 10 casho gudaheed Waa in ogeysiin natiijada a diraa 5 casho kulanka ka dib 	<p>Waa in si waqtiga aan ka baxsaneen loo jadwal gareeyaa</p>	<p>Waa in si waqtiga aan ka baxsaneen loo jadwal gareeyaa</p>	<p>Waa in aad dacwadda andacootaa intaan sanad laga soo wareegin gafka; inta badan natiijada la ogaadaa 60 casho gudaheed waqtiga la qoray dacwadda</p>	<p>Waa in aad dacwadda andacootaa intaan 180 casho laga soo wareegin gafka</p>	<p>Waa in aad dacwadda andacootaa intaan 2 sano laga soo wareegin gafka</p>
QARASHKA: WAALIDKA MIYAA BIXIYA	<p>Maya</p>	<p>Maya</p>	<p>Maya</p>	<p>Maya</p>	<p>Maya</p>	<p>Waalidka: qarashka qaareenka, dad marqaati ah ee taqasus ah (hadii loo baahdo) Haduu waalidku ku guuleysto, waxaa loo soo celinayaa qarashka qaareenka</p>